**JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA**
**Xeer – Sharci lamb. 2 ee 6 Maarso 1961**
**Xeer-nidaamiyaha lacagta**

## MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA EE JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qodobka 63 ee Dastuurka.

Kadib markii la garwaaqsaday baahida iyo degdegga loo qabo in la soo saaro xeer-nidaamiye cusub ee khuseeya lacagta.

Kadib markii la dhegeestay Golaha Wasiiradaha.

Kadib markii la dhegeestay soo jeedinta Ra'isul Wasaaraha oo uu la socota aragtida Wasiirka Maaliyada iyo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

## WUXUU XEERAYNAYAA

### Qod. 1
### Qiimaynta Lacageed

Waxaa laga dhisay dalka Jamhuuriyada Somaliya qiimo lacageed oo lagu magacaabay Shilin Somali oo markii la soo gaabsho loo qoro Sh. So.

### Qod. 2
### Sinaanta Dahabka

Shillinka Somalidu wuxuu ku qeyma yahay 0,124414 ee dahabka nadiifka ah.

### Qod. 3
### Soo Saarista Lacagta Waraaqda ah

Waxaa la amray in la soo saaro lacag waraaqda ah iyo lacag macdan ah oo Shillin Somali ah oo sidatan loo kale dhigay.

Lacag warqadeed: shan, toban, labaatan iyo boqol shillin.

Lacag macdan ah: hal, shan, toban iyo 50 senti iyo 1 iyo sha iyo 10 shilin.

### Qod. 4
### Awood soo Saarista

Waxaa iska leh awoodda wax soo saarka lacagta waraaqadaha ah iyo lacagta macdanka ah ee shilin somaalida ah ee Bankiga Qaranka Somaliya.

Suubinta shilinka somaliga waxaa lagu qondeeyn doonaa qaabka iyo goobta lagu xusay sharciga qod. 12.

### Qod. 5
### Astaamaha, Calaamoyinka iyo Tirada

Astaamaha, calaamoyinka teknikada iyo farshaxanka iyo tirada lacagta waraaqadaha iyo kuwa macdanta laga suubiyey, oo lagu amri doono dekreetooyin ka soo baxa Madaxweynaha Jamhuuriyada kadib markii uu dhegeeysta Golaha Wasiiradaha iyo soo jeedinta Golaha Bankiga Dhexe ee Somaliya.

### Qod. 6
### Habka Sharciga

Shilinka Somaliyeed iyo sarifkiisa tirada badan,waa lacagta keliya ee sharciga dalka Jamhuuriyadda Somaliya uu aqonsan yahay. Kaas oo noqonayaa in ay qasab ku

tahay ciddi heshiis kala gadasho gashay iyo wareejinta lacagta dadweynaha in ay aqbalaan, markii laga reebo xanibaadyada ku qoran qod. 7.

Si ku meel gaar ah waxaa la sii isticmaali kara 'shilinga Afrikada Bari' iyo midka' somali' ila iyo intiilaga dhameeyn doono sida ku carifan qod, 8 iyo 9.

**Qod. 7**

**Xadka Awooda Sarifka ee Lacagta Macdanta ah**

Xadka awooda sarifka lacaga shilinka somaliga ah wuxuu u dhigma sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| — Laagta macdanka ee 5 ilaa 10 shilin | : | 2 kun shilin |
| — Lacagta ilaa 1 shilin | : | 500 shilin |
| — Lacagta 50 senti | : | 100 shilin |
| — Lacagta 1, 5 iyo 10 senti | : | 10 shilin |

**Qod. 8**

**Lacagta Waraaqa ah iyo Wuwa Macdanta ah oo Shilinka Bariga Afrika**

Laagta waraaqaha ah iyo kuwa madanta ah shilinka Bariga Afrika oo hadda laga isticmaalo goballada waqooyi, waxay si ku meel gaar ah yeelan doonaan in si sharci ah loogu shaqeeysto isla gobolkaasi, ku wareenjinta gobollada konfureed waxay hoos tegi doonta nidaamka qiimenytooda.

Bangiga Qaranka ee Somaliya waxaa lagu amrayaaya dekreeto Madaxwynaha Jamhuuriyadda, kadib markii uu dhegeystay Golaha Wasiiradaha iyo tala soo jeedinta Golaha Bangiga, in inta ka horeysa 25 Juun 1961, la kala wareejiyo lacagta warqadaha iyo kuwa macdanta ah laguna beddelo ku shilin somaliga ah ee ku xusan qodobka 9.

**Qod. 9**

**Lacagta Waraaqadaha iyo kuwa Macdanta ah ee Shilin Somaliga ah**

Lacagta waraaqadaha iyo kuwa macdanta ah ee shilin somaliga ah oo lagu soo saaray amarka lamb 14 ee 18 May 1950, waxaay weli leeyihin awood sharci ee ganacsi ee dalka qeybkiisa konfuureed, isku bedelka ama u wareejinta qeybta Waqooyi waxay hoos tegi doonta xeer nidaamka qiimeynta ee markaas jira.

Kadib markii lagu beddelo shilinka Bariga Africa sida ku xusan qod. 8, lacagta waraaqadaha iyo kuwa macdanta ah ee shilin Somali ayaa awoodda ganacsi ee dalka oo idil yeelan doonto.

Waxay Bangiga Qaranka ee Somaliya waxaa lagu amraaya dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo dhegeystay Golaha wasiirada iyo Golaha Bangiga in si is daba jog ah u soo xareyo iskuna beddelo.

**Qod. 10**

**Isku Beddelka Wajiibaadka Lacageed iyo Qoraallada Xisaabaabka**

Laga bilaabo maalinta 30aad kadib markii dekreetadan-sharci ay hirgasho, waxaa wixii wajiibaad lacageed ee ahaa shilinka Afrikada Bari ama heshiis oo bixinta lacagtu laga raba in ay noqoto goob ka tirsan dalka Jamhuriyada waxaa lagu beddeli doona shilinka somaliga ah.

Isla muddadasi wax allaliyo wixii xisaabaad ah ama tilmaamaha lacageed waxay noqon doonan shilin Somali.

## Qod. 11
## Is Dhaafsixa Somaliga, Shilinka Afrikada Bari iyo Shilinga Somalida

Is dhaafsiga lacagta waraaqadaha ah iyo kuwa macdant ah ee Somali iyo shilinka Afrikada Bari sida ku tilmaaman qod. 8,9, iyo 10 waxay noqon doonta mid isla eg.

Madaxwynaha Jamhuuriyadda, kadib markii uu dhegestay Golaha Wasiiradaha, iyo soo jeedinta Golaha Bangiga Qaranka, wuxuu wax ka beddeli kara is dhaafsiga shilinka Afrikada Bari iyo Shilinka Somali, haddi ay dhacdo in is bedel ka weyn boqolkii 2 ee qiimaha dahabka uu leeyahay shilinga Afrikada Bari.

## Qod. 12
## Wakilashada Sharciyeed

Dowladdu waxay awood u leedahay in ay ku soo saarto dekreetoyin 12 bilood kadib markii uu sharcigaan hirgalo, xeer nidaamyo khuseeya soo saarka, iyo sood siinta lacagta waraaqdaha iyo kuwa macdanta ah.

Nuxurka dekreetoyinka waxaa habeyn doona Guddi uu madax u yahay Wasiirka Maliyada oo ka kooban 8 qofood oo leh khibrad oo Golaha wasiiradu iyo Madaxweynaha iyo Guddomiyaha Guud ee Bangiga Qaranka Somaliyed ay soo jeediyeen.

Howlaha Xoghayaha Guddigaani waxaa fulin doono howlwadeen sare ee Bangigaas. Guddiga waxaa lagu magacaabi doona dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda isagoo tala uu ka bixiyey Rai'sul Wasaaraha iyo Golaha wasiiradaha.

Waxaa weli yeelan doono nidaamo ku qoran faqradda qod. 8 ee xeerka lamb 14 ee 18 May 1950, kaas oo Somaliya oo idil lagu dabaqi doono, inta ka khuseeysa nidaamka ka jira Italiya ee la xirira soo saarka iyo suubinta lacagta waraaqadaha ah iyo kuwa macdanta ah.

## Qod. 13
## Burin

Waxaa la buriyey sharci kast oo ka soo horjeeda sharcigaan.

## Qod. 14
## Isku Bedelidda Sharci

Dekreeto – sharci waxaa la horgeyn doona Golaha Barlamaanka Qaranka si loogu beddelo shari.

Muqdisho, 6 Maarso 1961.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirashid Cali Shermarke**

Wasiirka ku meel gaarka ah ee Maaliyadda
**Abdirashid Ali Shermarke**

Wasiirka Warshadaha & Ganacsiga
**Abdulla Mohamud Mohamed**

La arkay lana diwaan gelieyey lamb 5 warqadda 124

Muqdisho, 6 Maay 1961.

Xisaabiyaha Guud: **Axmed Dahir**